# Barnaamijyada ardayda ee ka baxsan wakhtiga dugsiga

## Caawimaada Ka Baxsan Dugsiga

Gudaha Ohio, waxa jira barnaamijyo ardaydu ku biiri karaan wakhti ka baxsan wakhtiga dugsiga. Barnaamijyadani waxay noqon karaan kahor ama kadib dugsiga. Qaarkood waxaa laga yaabaa inay jiraan xiliyada fasaxyada dugsiga. Barnaamijyada qaarkood waxay siin karaan taageero dheeraad ah ardayda u baahan in laga caawiyo dugsiga. Waxay ka caawin karaan ilmaha inay ku si wanaagsan wax uga bartaan dugsiga iyagoo siinaya goobo xasiloon oo ay ku qabtaan shaqada guriga oo ay galaan kombuyuutar iyo internetka. Waxay sidoo kale ku siin karaan caawimaad dheeraad ah shaqada dugsiga ama waxay yeelan karaan hawlaha madadaalo leh oo bara waxyaabo cusub. Barnaamijyadan, caruurtu waxay ku samaysan karaan saaxiibo cusub oo ay wax ka baran karaan kuwa kale. Qoysasku waxa laga yaabaa inay u baahdaan inay diiwaangeliyaan ilmahooda ama ay la kulmaan sharciyo gaar ah. Barnaamijyadani waxay noqon karaan lacag la'aan ama waxaa jiri kara kharashyo dheeraad ah. Xitaa qaar kamid ah caruurta siiya cunto ama ka caawinta gaadiidka.

## Guudmarka Barnaamijyada

### Barnaamijyada Kahoreeya ama Kadambeeya saacadaha dugsiga

Barnaamijyada Kahoreeya ama Kadambeeya saacadaha dugsiga inta badan waxay ka dhacaan dugsiga ama goob u dhow ama bulshada dhexdeeda. Barnaamijyadu waxay ku dhiirigeliyaan caruurta da' kasta leh inay horumariyaan xirfadahooda waxbarasho, bulsho, iyo shucuur ahaaneed. Shakhsiyaad loo tababaray ayaa ka caawiyaan ardayda shaqada dugsiga iyo xirfadaha kale. Wakhtiyada qaarkood, barnaamijyadani waxay bixiyaan cunto fudud ama cunto.

### Wax baritaan

Wax baritaan waa marka qof ka caawiyo qof kale inuu barto waxyaabo cusub. Tani waxay ka dhici kartaa dugsiga ama bulshada dhexdeeda. Qof wax bara waa sida macalin ama tababare.

Waxay ka caawiyaan ardayga waxyaabo ay kamid yihiin shaqada dugsiga ama barashada xirfado cusub. Macalimiinta wax bara waxay noqon karaan kuwa waaweyn ama arday kale oo isku fasal ah ama ka weyn. Barnaamijyada wax baritaanka waxay ka caawin karaan ilmaha inay ku dhaqmaan xirfadahooda Ingiriisiga oo ay aad ugu xirnaadaan bulshadooda. Wax baritaanka waxay horumarisaa xirfadaha isgaarsiinta waxayna siisaa taageero iyo dhiirigelin dheeraad ah caruurta si ay ugu wanaagsanaadaan dugsiga.

## Wax baritaan Tacliin ahaaneed

Tababarayaasha tacliin ahaaneed waxay la mid yihiin macalin wax bara, laakiin waxay diirada saaraan maadooyinka tacliinta. Waxaa laga yaabaa inay ardayda wax u baraan si gaar ah ama koox ahaan. Barnaamijyada wax baritaanka waxay ardayda ka caawiyaan layliga guriga iyo hawlaha dugsiga. Qaar kamid ah barnaamijyada waxbaritaanka ayaa laga yaabaa inay ku caawiyaan maadooyin gaar ah sida Ingiriisiga, xisaabta, sayniska, iyo kuwa kale oo badan.

Maktabadaha dadwaynaha qaarkood waxay leeyihiin caawimaada layliga guriga oo lacag la'aan ah, wax baritaanka, ama barnaamijyo kale oo loogu talagalay ilmaha iyo qoysaska. Waxaa kale oo laga yaabaa inay ka caawiyaan ardayda waxbarashada khadka fogaan araga ah. Si aad u ogaato marktab dadweyn oo kuu dhaw, booqo websaytka Library Ohio.

## Xeryaha Xagaaga

Xeryaha xagaaga (ama barnaamijyada xagaaga) waxay dhacaan xiliga fasaxa xagaaga. Waxay ka caawiyaan ilmaha inay bartaan mawduucyo kala duwan oo ay la xiriiraan ilmaha kale. Xeryaha xagaaga waxaa laga yaabaa inay diirada saaraan tacliinta, dhaqanka, hawlaha dibada, ama hawlaha jirka. Xeryaha qaarkood waxaa laga yaabaa in xubnaha xeryaha ay ku hoydaan ama aadaan beeraha nasashada si ay u siiyaan qolal badan oo loogu talagay hawlo iyo barashada aduunka dabiiciga ah.

## Barnaamijyada Hormarinta Dhalinyarta

Barnaamijyada horumarinta dhalinyaradu waxay dhici karaan sanad dugsiyeedka oo dhan marka la eego goobta bulsho. Barnaamijyadu waxay diirada saaraan ka caawinta ilmaha inay

horumariyaan xirfadaha ay u baahan yihiin iyadoo lagu saleynayo da'dooda.

### Barnaamijyada Dhaqan ahaaneed

Barnaamijyada dhaqan ahaaneed waxay u ogolaadaan ardayda inay wax badan ka ogaadaan dhaqankooda iyo dhaqamada kale. Barnaamijyadani waxay ujeedadoodu tahay inay ka caawiyaan ardayda inay ilaaliyaan dhaqankooda, bartaan luuqadooda, iyo inay dareemaan inay ku xiran yihiin bulshadooda.

### Tababarada Shaqo

Barnaamijyada tababarada shaqo waxaa badanaa la siiyaa ardayda dhigata dugsiga sare. Ardaydu waxay helaan khibrad shaqo waxayna bartaan fursado shaqo oo kala duwan. Barnaamijyadan waxaa laga yaabaa in lagu bixiyo dugsiyada, goobaha ganacsiyada, ama ururada kale ee bulshada. Inta badan, ardaydu waa inay codsadaan oo la doortaa.

### Barnaamijyada Isboortiga

Waxaa jira kooxo isboorti oo kala duwan oo loogu talagalay ardayda. Kooxahani waxay ku salaysnaan karaan bulshada ama dugsiga.

### Barnaamijyada Tabaruca

Barnaamijyada u adeegitaanka si ikhtiyaari ah waxay siinayaan ilmaha iyo dadka da'da yar fursad ay ku yeeshaan saameyn togan bulshooyinkooda. Dadka si ikhtiyaariga ah u shaqaynaya waxay ka qaybqaadan karaan hawlaha sida lacag ururinta, abaabulka munaasabadaha, waxbaritaanka, bixinta latalinta, ama ka shaqaynta mashaariic kala duwan si ay u gaaraan ujeedooyinka barnaamijka. Barnaamijyadan waxaa sida caadiga ah qabanqaabiya ururo aan samafal, ururada bulshada, dugsiyada, ama wakaaladaha dawladda. Waxay door muhiim ah ka ciyaaraan abaabulka kheyraadka iyo hormarinta gayo-qabka shakhsiyaadka iyo bulshooyinka u baahan.

## Sidee ugu heli kartaa barnaamijyada ilmahaaga?

Hal meel oo aad ka bilaabi karto waa adigoo waydiinaya asxaabtaada ama xubnaha

[Copyright] ©2024 Center on Education and Training for Employment, The Ohio State University 

qoyskaaga, gaar ahaan haddii ay ilmo haystaan. Waxaa kale oo aad waydiin kartaa haddii ay garanayaan ururada bulsho oo laga yaabo inay wax ka ogaadaan barnaamijyada. Barnaamijyo badan ayaa lagu bixiyaa ururada bulshada. Hogaamiyayaasha bulshada iyo ururada la shaqeeya qoysaska sida wakaaladaha adeega bulshada, maktabadaha dadweynaha, kaniisadaha, iyo xitaa isbitaalada ayaa sidoo kale laga yaabaa inay hayaan macluumaadka ku saabsan barnaamijyada.

Waxaad sidoo kale ka ogaan kartaa dugsigaaga barnaamijyada loo heli karo ilmahaaga. Haddii aadan hubin halka aad ka bilaabayso, waxaad weydiin kartaa qof kasta oo jooga dugsiga ilmahaaga. Dugsiga ilmahaaga, macalimiinta, xiriiriyayaasha qoyska, shaqaalaha bulshada ee dugsiga, ama la-taliyayaasha dugsiga ayaa laga yaabaa inay ogaadaan barnaamijyada kala duwan oo ay heli karaan ardayda.

Booqo liistada ururkayaga si aad wax badan uga ogaato barnaamijyada iyo ururada bulshada. Waxaad sidoo kale oo aad macluumaadkan la wadaagi kartaa macalimiinta iyo shaqaalaha dugsiga.

## Su'aalo noocee ah ayaan waydiin karaa si aan wax badan uga ogaado?

- Halkee ayaan aadi karaa si aan u ogaado barnaamijyada ka baxsan dugsiga ilmahayga?
- Waa maxay noocyada barnaamijyada laga heli karo goob ka baxsan dugsiga si ay u taageeraan waxbarashada ilmahayga?
- Halkee ayaan geyn karaa ilmahayga si aan uga helo caawimaada layliyada guriga iyo shaqada guriga?
- Sidee ayuu ilmahaygu u heli karaa caawimaada shaqada dugsiga? Sidee ilmahaygu caawimo uga heli karaa {insert subject area}?
- Waa maxay barnaamijyada caawiya ardayda luuqadaha badan ku hadasha ee baranaya Ingiriisiga?
- Waa maxay barnaamijyada bixiya macluumaadka tarjumaada ama leh turjubaano loogu talagalau waalidiinta iyo qoysaska?

## Maxaan ka fiiriyaa si aan u ogaado in barnaamijku uu u fiican yahay ilmahayga iyo in kale?

Waxaad isticmaali kartaa liiska su'aalaha si ay kaaga caawiyaan inaad u doorato barnaamijyada ilmahaaga.

- Halkee ayuu barnaamijkan ka dhacayaa?
- Ma bixisaan adeegyada gaadiidka? Ma jiraan ikhtiyaaro kale oo adeegyada gaadiid?
- Goorma ayuu barnaamijkan dhacayaa?
- Waa maxay hadafka barnaamijka?
- Sidee ayuu barnaamijkan u taageeraa waxbarashada ilmaha?
- Sidee ayuu barnaamijkani u caawiyaa ardayda baranaya luuqada Ingiriisiga?
- Ilmahaygu ma ku dareemayaa soo dhawayn iyo badqab barnaamijka? Aniga iyo qoyskayga maku qanacsanahay oo ma nalagu soo dhawaynayaa barnaamijka?
- Miyaan u baahanahay inaan lacag ka bixiyo barnaamijkan? Ma jiraan ikhtiyaaro kharash ahaan la awoodi karo ama qiimo jaban?
- Shaqaalaha ma yihiin kuw masuul ah oo daryeel leh?
- Shaqaaluhu ma loo tababaray inay ardayda siiyaan taageero iyo hagitaan?
- Barnaamijku ma ku yaal goob nadiif ah oo badqab leh?
- Hawlaha ma ku haboon yihiin da'da?
- Ma jirtaan goobo ku filan qof walba inuu hawlaha ku qabto?
- Barnaamijku ma bixiyaa kombuyuutar ama aalad kale oo ilmahaygu u baahan karo?
- Ma jiraan wax cunto fudud ama cunto la bixiyo?
- Intee jeer ayay ilmuhu u baahan yihiin inay yimaadaan? Maxaa dhacaya haddii ilmahayga ka maqnaado kulan?

Waxaad booqan kartaa websyatka Colorin Colorado ee barnaamijyada dugsiga kadib si aad wax badan u ogaato.

## U diiwaangelinta Ilmahaaga Barnaamij

Waxaad waydiin kartaa qof kamid ah barnaamijka sida loo diiwaangeliyo ilmahaaga. Barnaamijyada qaar ayaa laga yaabaa inay kaa rabaan inaad buuxiso foomamka ama aad bixiso macluumaadka ku saabsan ilmahaaga ama qoyskaaga. Xusuusnow, waad codsan kartaa turjubaan ama waxaad heli kartaa macluumaad lagu turjumay luuqada aad doorbidayso. Haddii barnaamijku ka jiro dugsiga, waxa laga rabaa inay ku siiyaan macluumaadka luuqada ay doorbidaan qoysaska.

### Marka aad diwaangaliso ilmahaaga

- ✓ Xaqiiji marka barnaamijku dhacayo. Waxaad dhahdaa, "Aan hubiyo inaan haysto macluumaadka saxda ah. Halkee ayuu barnaamijkan ka dhacayaa?
- ✓ Hubi haddii barnaamijku u xiran yahay fasaxyo gaar ah ama fasaxyo. Waydii, "Barnaamijku maku xiran yahay fasax kasta ama nasasho kasta?"
- ✓ U sheeg haddii ilmahaagu qabo wax xasaasiyad ah ama xaddidaad cunto gaar ah. Waxaad ku dhaahdaa, "Ilmahaygu wuxuu xasaasiyad ku qabaan [sheeg waxa ay xasaasiyad ku qabaan]. Ilmahaygu ma cuni karo [[sheeg xadidaadda cuntadooda ay tahay]."
- ✓ Weydii waxa aad samayn lahayd haddii ilmahaagu maqnaado. Weydii, "Maxaan sameeyaa haddii ilmahaygu maqnaado? Ma jiraa qof aan la xiriiro ama aan waco?"
- ✓ Hubi haddii ilmahaagu u baahan yahay inuu la imaado alaab ama agab gaar ah. Weydii, "ilmahaygu ma u baahan yahay inuu la imaado shay ama agab gaar ah si uu uga qaybqaato barnaamijka?"
- ✓ Kaydso macluumaadka xiriirka barnaamijka sida lambarka taleefanka, websaytka, ama iimaylka. Weydii, "Halkee ayaan ka heli karaa macluumaadka qofka lagala xiriiro barnaamijkan?"

## Kheyraad Dheeraad ah

- Waxaad wax badan ka ogaan kartaa NCELA Family Toolkit marka aad doorato Cutubka 3 "Barnaamijyada iyo Adeegyada kale ee Waxbarasho ee Loogu talagalau Ilmahaaga" ama Cutubka 4 "U Helitaanka Hawlo Manhajka Ka Baxsan Ilmahaaga." Waxa lagu heli karaa afar luqadood (Ingiriis, Carabi, Shiinays, iyo Isbaanish). https://ncela.ed.gov/educator-support/toolkits/family-toolkit
- Mashruuca u Dooditaanka Ilmaha (The Children's Advocacy Project) wuxuu bixiyaa macluumaadka ku saabsan dugsiga kadib iyo barnaamijyada xagaaga ee Ohio. https://cap4kids.org/columbus/after-school-camps
- Mashruuca U Dooditaanka Ilmaha (The Children's Advocacy Project provides) wuxuu bixiyaa macluumaadka iyo kheyraad ku saabsan barnaamijyada ka dhaca Bartamaha Ohio ee loogu talagalau ilmaha iyo qoysaska. https://cap4kids.org/columbus/minority-and-immigration-services/resources-for-all-immigrants-and-refugees
- Helitaanka lacag la'aanta ah ee buugaagta ka sokow, maktabado badan oo dadwaynuhu waxay leeyihiin caawimaada layliga guriga oo lacag la'aan ah, baritaanka tacliin ahaaneed, ama barnaamijyo loogu talagalay caruurta iyo qoysaska ah. Waxay sidoo kale oo laga yaabaa inay ka caawiyaan ardayda waxbarashada khadka fogaan araga ah oo ay ka caawiyaan inay helaan kombiyuutarada, internetka, iyo tiknoolajiyada kale ee ay u baahan karaan. Si aad u hesho maktabad dadweyne oo kuu dhow, booqo websaytka Maktabada Ohio. https://library.ohio.gov/using-the-library/find-an-ohio-library

*Khayraadkan waxay ujeedadoodu tahay inay xoojiyaan tacliinta, fayo-qabka ardayda iyo kuliyada iyo natiijooyinka shaqada ee ardayda luuqadaha badan ku hadla ee Ohio. Khayraadka waxaa lagu sameeyay dadaal iskaashi oo u dhexeeya Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Ohio (Ohio Department of Education and Workforce) iyo Ohio State University's Center on Education and Training for Employment oo ay weheliso koox u heelan oo u doodaha qoyska, hogaamiyeyaasha bulshada, shaqaalaha dugsiga degmada, iyo macalimiinta.*

[Copyright] ©2024 Center on Education and Training for Employment, The Ohio State University 